



Warbixin ku saabsan tiibishada qarsoonWaa maxay tiibisho?

Tiibishadu waa bakteeriya ama jeermis faafa oo la isqaadsiiyo, inta badan waxaa uu ku dhacaa sambabada, balse waxaa uu aseebi karaa oo weerari karaa xubnaha kale ee jirka.

Siddee ayaa tiibishada la isu qaadsiiyaa?

Kolkii uu qufaco qof tiibishada sambabada qabaa waxaa hawada gala bakteeriyadii, ka dibna qofkii ka ag-dhow ayaa qaadanaaya hawadii jeermiska xambaarsanayd. Dhamaan dadka u dhow qofka tiibishada qabaa ma ay wada qaadaan cudurka

Waa maxay tiibishada qarsooni?

Dadka uu cudurka tiibishadu saammeeya dhamaantood ma xanuunsadaan. Difaaca jirka ayaa ku guuleysan kara inuu joojiyo in bakteeriyadii sii fido ama ay kobocdo. Bakteeriyadii waxaa ay ku jirtaa jirka gudahiisa balse ma aha mid firfircoon ee waa mid iska jiiifta. Taas ayaa lagu magacaabaa tiibishada qarsoon.

Qofkii qaba tiibishada qarsooni

- Waa mid caafimaad qaba
- Kuma faafin karo bakteeriyadii dadka kale
- Waxaa uu haystaa PPD wanaagsan (tijaabada jirka) ama IGRA (tijaabada dhiiga) oo wanaagsan

Miyaa lasoo kicin karaa tiibishada qarsoon si ay u noqoto mid cudur ah oo firfircoon?

Haa, laakiin ma aha mid badanaaba dhacda. Sagaal meelood tobankii qof ee qaba tiibishada qarsooni ma noqdaan kuwo cudurkoodu u gudbo mid firfircoon. Khatarta in jeermiska tiibishadu noqdo mid firfircoon waxaa ku dhici kartaa ama ay khatartu weyn tahay

- Haddii uu qofku dhowaan cudurka qaaday, Labada sano ee ugu horeeya ka dib kolka qofka lagu daarto cudurka
- Caruurta yar yar
- Dumarka xaamilada ah
- Haddii uu qofku qabo xanuuno kale ama uu qaato daawo saamayn ku yeelan karta unugyada difaaca jirka.

Waa maxay calaamadaha lagu gartaa kolkii cudurka tiibishadu yahay mid firfircoon?

- Qufac wakhti dheer qaata ka badan 3 usbuuc
- Kuleyl jirka ah (feeber)
- Qofka oo habeenkii dhidida
- Culayska qofka oo dhaca isaga oo aan sidaas dooneynin
- Xubinta jirka u qaabilsan faafreebka oo bararta

Haddii uu qofku isku arko mid ka mid ah calaamadahaan aan kor kusoo sheegnay, waa in lala xiriiraa dhakhtarka si meesha looga saaro jiritaanka cudurka tiibishada.

Miyaa la daaweyn karaa tiibishada qarsoon?

Mararka qaarkood qofka qaba tiibishada qarsoon waxaa la siiyaa daawo si looga hortago in aan cudurku soo kicin oo faafin mustaqbalka ,noqona mid firfircoon. Qofkii markaas lagu daarto tiibishada waxaa ay u badan tahay in bakteeriyadu noqoto mid firfircoon oo jirka gasha mar haddii aan laga daaweynin.